
# DHIMAAL DHAQAN

***Buug Mudan Kaabe Waxbarasho***

---

*Caliqeyr M. Nuur*
*25 Abriil 2025*




**XOGTA GUUD**

- Magaca: Dhimaal Dhaqan.
- Qoraaga: Bashiir Maxamed Xersi ‘Ina Cubra’
- Ujeedka: Falanqaynta habdhaqanka Soomaalida.
- Daabacaadda: Laashin Publishers – Sweden, 2022.
- Tirada: 202 bog.
- ISBN:  978-91-986818-2-6

## ARAR

Qormadani waxay falanqaynaysaa buugga *Dhimaal Dhaqan* ee uu qoray Bashiir Maxamed Xersi. Waxaa diiradda lagu saarayaa doorka uu buugganni ka qaadan karo kobcinta waxbarashada sare ee Soomaaliya. Si kooban ayaa la isu dultaagayaa qaar ka mid ah aragtiyada uu buuggu xambaarsan yahay, gaar ahaan kuwa la xiriira dhaqanka taban ee loo eersan karo burburka bulsheed iyo qaranjabkii Soomaaliya. Dhanka kale, qormadu waxay muujinaysaa gaabiska buuggan ku jira ee u baahan in la ebyo si uu u noqdo kaabe ku suubban agabka waxbarasho ee cilmiga bulshada.

## ARAGTIDA CUSUB

Raadraaca lagu sameeyo hoos u dhaca anshaxa bulshadu waa arrin u baahan dhiirri iyo baaritaan xeeldheer. Waxaa suuragal ah in uu aqoonyahanku dhib weyn kala kulmo farmuuqa anshaxda taban sida musuqa, kelitalisnimada, iyo dhaqamada weecsan ee la qabatimay. Sida ay Soomaalidu tiraa, *“caado la gooyo caro Alle ayey leedahay*” marmar ayuu qoraagu halis ku galaa shaacinta arrimo ku daaban caado ama aayado diimeed oo si weecsan  loo fasirtay. Tusaale ahaan, Ignaz Semmelweis oo la sheego in uu daahfurkiisu asaas u ahaa hababka ka hortagga jeermiska ee goobaha caafimaadka ayaa aragtidiisii geeri ku mutaysay. Qoraagani wuxuu sanadkii 1861  buug dhan ka qoray sida uu faraxalka shaqaalaha caafimaadku waxtar ugu yeelan karo yaraynta geerida dhallaanka – waa xilli ay jirtay qandho halis ahayd oo ay carruur badan u la’anaysay. Qoraagaas, lama afwaajin oo keliya balse maadaama ay taladiisu ka hortimid aragtidii diimeed ee hiigaanyada, waxaa si jujuub ah loo geeyey xarun dadka dhimirka la’ lagu hayo – halkaas ayuu ugu dambayn ku geeriyoon doonoaa. Xilligan la joogo oo lagu sheego – *Waayaha Casriga,*  diidmada aragtida ugubka ahi waxay u dhacdaa siyaaba dadban,  sida in qofka aragtidiisa laga horkeena golayaasha ay la xiriirto, ama in isagaba si dadban loo dhagro.

Diidmada aragtida xeeldheerayaasha, colleysiga daahfuryada cusub, iyo iska-caabbinta isbeddelku waa astaamaha geerida ee xagga dhimirka iyo anshaxa guud ee bulshada. Waxaa taas la mid ah qofka geeriyoonaya oo lagu garto in aanu dheefna qaadan, qashinsaar jireedna samayn, ama haddii si kale loo dhigo – *qof aan tala-keen iyo tala-raac midna ahayn*. Bashiir M. Xirsi, isagu talo ayuu keenayaa isaga oo si farshaxan iyo tusaale leh u muujinaya iimaha xagga dhaqanka ah ee gaasiriyay horumarkii ay Soomaalidu filaysay taniyo waagii gumaysiga laga xoroobay. Buuggiisan *“Dhimaal Dhaqan”* qoraagu wuxuu si qoto dheer uga hadlayaa sababaha dibudhaca iyo qaranjabka Soomaaliya. Xagal heer qofeed ah ayuu arrimaha intooda badan ka soo eegayaa isaga oo dacalla badan ka falanqaynaya labaatan iimood oo bulshada dhexdeeda ka noqday dhaqan la oggol yahay. Abaaldhaca, ballanfurka, danaysiga, dulqaadyarida, quuriweytada, islaweynida iyo habdhaqan badan oo gurracan ayuu qoraagu si layaab leh u soo bandhigayaa doorka ay ku leeyihiin dibudhaca iyo colaadaha sokeeye ee dalka aafeeyey. Danta qormadani waa inay si kooban u biniiniso sida uu buuggu ugu habboon yahay ku biirinta kaabayaasha waxbarashada sare ee dalka, gaar ahaan laamaha cilmiga bulshada.

## DULMARKA BUUGGA

Marka la jalleeco xagga wabarashada madaniga ah ee Soomaaliya, gaar ahaan agabka waxbarasho ee cilmiga bulshadu waa qabyo ay baahi weyni ka taagan tahay. Xilligan kala-guurka ah ee loo dhexeeyo burburka iyo dibudhiska ayaa mudnaan siinaya aragti kasta oo kobcinaysa garaadka, baraarugga, aqoonta, iyo xilkasnimada dhaladka (muwaaddinka). Buugga *Dhimaal Dhaqan* ee uu qoray Bashiir M. Xersi 'Ina Cubtan' waa buug lagu dhigay iimo badan oo uu dhaqanka Soomaaliyeed leeyahay. Haddii si kale loo dhigana wuxuu weyneyso ku muujiyey dhaawaca maskaxeed – xagga dhaqanka ee bulshada ka dhex jira. Sidii uu James buuggiisii ku yiri, *"Hadba dhaqanka aan ku dhex noolnahay ayaa go'aamiya falalka nala qurxan,*" (b. 105). Waxaa jira dhaqamo xididdaystay oo arrimo badan u ekaysiiyey wax iska caadi ah, sida haybsooca beelaha xirfadlayaasha ah iwm. Abwaan Bashiir, isaga oo cutub dhan arrinkaas uga hadlaya ayuu oranayaa *"Qof gef gala, haybsooc wuu mudan yahay oo waa ta ganaax lacageed ama shaqo ka sokow, xabsi la geliyo …" (b 137)* halkan wuxuu qoraagu takoorka ku koobayaa qofkaas gefka galay, isaga oo weyddiimo ka keenaya sababta ay firka dambe ee qofkaasi u xambaari karaan eedihii awowgood galay. Ma aha weyddiimo oo qura balse waa warcelin milgo leh.

Arrimaha uu ku fogaanayo waxaa ka mid ah musuqa oo uu laba heer u kala qaaday: 1) mid ay cidda musuqa waddaa tahay dhabiil sida bakaartii raashinka u aasta hantida iyo lacagaha qaranka, iyo, 2) mid hantida uu xado la wadaaga dadka kale isaga oo ku abuuranaya magac siyaasadeed. Kan koowaad wuxuu u bixiyey "keligii-cune" kan dambana "suncunsiiye" halkaas ayuu ka dhalinayaa su'aal oranaysa – *keligii-cunaha iyo suncunsiiyaha kee daran?* (b. 169) Sida weedhii Ciulla ee ahayd *"Musuqu keliya ma wiiqo dhaqaalaha dalka, wuxuuse aafeeyaa nidaamyada siyaasadeed oo dhan, heer ay xitaa hoggaanka wanaagsani ka quustaan wax ka qabashadiisa,"* (b. 62), ayuu Bashiirna qaadaadhigayaa sida uu dhaqankaas tabani u saameeyo bulshada iyo horumarka guud ee dalka.

Qoraagu wuxuu is dultaagayaa lix iyo toban iimood oo aad uga dhex muuqda dhaqanka taban ee bulshooyinka caalamka balse uu isagu diiradda saaray Soomaalida iyo saamaynta ay ku leeyihiin. Waxaad mooddaa inuu buuggu toos u abbaarayo xuddunta dhibaatooyinka haysta Soomaalida maanta – sida kala qaybsanaanta, kalsoonidarrada shacabka, hoggaan-xumida, xagjirnimada baahday, iyo iimaha kale ee uu qaranjabku la yimid. Midnimo la'aanta Soomaalida ku dhacday ayaa cutubyada buugga aad ugu dhex muuqata. Sidaas oo kale ayuu qoraagani mowduucaas ku fogaaday isaga oo buuggiisii "Hilaadin" kala-daadashada midnimadii umadda ku sifeeyey *"kelisocodnimo aan ku dhisnayn qunyarsocodnimo,*" (Hilaadin, b. 75). Dhanka kale, afka buugga oo ah mid fudud haddana suugaamaysan ayaa aqriskiisa xiisa gaar ah u yeelaya, waana mid abuuraya baraarug ay baahidiisu taagan tahay.

## KAABE WAXBARASHO

Buug kasta oo lagu darayo manhajka waxbarashada ama kaabayaasha cilmiga bulshadu waa in uu yeesho tayo kobcinaysa aqoonta iyo aragtida ardayga. Ugu horreyn waa in uu ka tarjumayo dhaqanka iyo saha nololeed ee dalka ka jira, abuurayo baraarug saamayn leh, ku dhisan yahay falanqayn

aqooneed, isla markaana xal ama ka-hortag u yahay dhibaatooyin jira ama kuwa iman kara. Haddaba sababaha uu *Dhimaal Dhaqan* ugu suubban yahay u adeegsiga kaabayaasha waxbarasho ee cilmiga bulshada waxaa ka mid ah:

1. Baraarujin togan – wuxuu ka hadlayaa dhib jira iyo maaradii lagu toosin lahaa. Si isku dhafan ayuu u falanqaynayaa iimo ku yimid dhaqanka guud, sida musuqa, haybsooca, abaaldhaca, quuriweytada iwm. Marna iimaha ay colaadaha sokeeye keeneen ayuu is dultaagayaa sida beelaysiga, goboleysiga, iskaashi-diidka iwm. Arrimahani waxay ardayga barayaan habdhaqan taban oo door ku leh dibudhaca bulsheed, qaranjabka, iyo weliba sida looga hortago.

2. Handhis iyo isbeddel – iimaha xagga dhaqanka ayuu inta badan qoraagu ka eegayaa xagal cilminafsi bulsheed (social psychology) ah. Habkani wuxuu ardayga tusayaa siyaabaha kala awran ee arrimaha qaar loo rogrogi karo si looga gungaaro xididkooda hoose. Haddana, isaga oo adeegsanaya afmaalmeed fudud ayuu falanqaynta ku larayaa maahmaaho, gabayo, geeraarro iyo suugaan kala heer ah. Halkan, waxaa ka muuqda farshaxan yaab leh oo ardayga bari kara xirfadda adeegsiga afka laamihiisa kala duwan.

3. Cilmibaaris bulsheed oo qoto dheer – buuggu wuxuu isku deyayaa in uu ka warceliyo su'aasha ah – *maxaa Soomaaliya dib u dhigay?* Halkaas ayuu ka xulanayaa dhaqannada taban ee ugu saamaynta badan. Haddaba, dhibka iyo maarada isku sidkan ee buuggu soo bandhigayo waxay ardayga u suuragelin karaan inuu aragti weyn ka haysto habdhaqanka bulshadiisa. Tani waxay dhalinaysaa baraarug ku aaddan dabaceedaha ay tahay in laga digtoonaado iyo kuwa lidkooda ah ee u baahan in la naaxiyo.

Aragtida qormadani waa in uu *"Dhimaal Dhaqan"* ku habboon yahay agabka kaabayaasha u ah waxbarashada, gaar ahaan heerka fasalka 11aad ee dugsiga sare ilaa heerka koowaad ee jaamacadda. Marka laga hadlayo cilmiga bulshada, waa suuragal in aqoonta ardayga dugsiga sare ay ku kooban tahay fikradaha bulsheed ee aasaasiga ah, sida nolosha qoyska, ama dhaqanka iyo habnololeedka guud ee degaankiisa. Si taas ka duwan, ardayga heerka 1aad ee jaamacaddu wuxuu u banbaxay aqoon intaas ka xeeldheer. Waxaa u daahfurmaya arrimo dhaafsan bowdka degaankiisa, sida is barbardhigga aragtiyo kala duwan, cilmibaaris sahminaysa xaalado dahsoon, iyo rabitaanka isbeddel uu ka sameeyo wixii sahankaas uga dhuroobay. Waxaa la oran karaa ardayga dugsiga sare weli wuxuu u okobban yahay dhaqanka degaankiisa, halka uu ardayga jaamacaddu ka helay madaxbanaani yar oo ay aqoontu siisay. Sidaas ha ahaatee, labaduba waxay ka midaysan yihiin, awoodda aqriska, iyo in ay wada dhaadi karaan sinnaan la'aanta, takoorka, haybsooca, nabaadguurka, iyo dhibaatooyinka bulsheed ee dalkooda ka jira.

## WAXA KA DHIMMAN

"Dhimaal Dhaqan" si uu u noqdo kaabe lagu biiriyo agabka waxbarasho ee cilmiga bulshada, waxay qormadani qabtaa:

- In uu fiiro u celiyo in habqoraalku la gudboon yahay kan loo adeegsado agabka waxbarashada ee ay diyaariyeen hay'adaha dalku. Habqoraallada kala duwani waxay ardayda ku dhalin karaan qalqal xagga garashada ereyada, isku-xirka weedhaha, iyo nidaamka guud ee dhigaalka af Soomaaliga.

- In lagu caddeeyo in uu yahay buug waxbarasho, iyo weliba da'da loogu talagalay. Halkan waxaa ka dhalanaya in uu buuggu yeesho ereyfuryo iyo qeexitaanno ku sargo'an hadba da'da ama heerka waxbarasho ee loo asteeyay.

- In la raaciyo muuqaallo, iyo dhacdooyin kooban oo tusaale ah. Muuqaallada iyo dhacdooyinku waxay xoojinayaan garashada maaddada. Gaar ahaan, dhacdada tusaalaha ahi waxay ardayga hortiisa keenaysaa xaaladda uu dhaqanka tabani ka abuuri karo nololmaalmeedka dhabta ah.

- In la raaciyo laylisyo, iyo weyddiimo lagu hubinayo fahamka ardayga. Laylisyadu, marna waxay ardayga u yihiin milicsiga wixii uu soo bartay, marna waxay horumarinayaan awoodda dhaqangelinta casharka uu qaatay.

Waxaa kale oo iyaduna mudnaan leh la-tashiga xeeldheerayaasha afeed, gaar ahaan kuwa ku lugta leh dejinta manhajka waxbarashada. Kooxdani waxay bixin kartaa talo ku aaddan baahida laanta iyo weliba tayada looga baahan yahay agabka waxbarashada. Waa muhiim, in xubin manhajka ku lug leh laga helaa hagitaan, inta lagu jiro dib u habaynta koowaad ee buugga.

## GUNAANUD

Maadaama uu dalka Soomaaliya ka soo kabanayo burbur iyo dagaal sokeeye, *Dhimaal Dhaqan* wuxuu ardayda u leeyahay waxtar aan laga maarmin. Iimaha uu buuggani maarada u raadinayo ayaa dhammaantood ah kuwa ka dhashay ama ay naaxiyeen colaadaha sokeeye. Sidaas awgeed, falanqaynta iyo talooyinka uu Bashiir M. Xersi soo bandhigayo waxay door ku yeelan karaan kobaca xagga garaadka ah ee jiilka soo koraya. Waa buug mudan in ay hay'adaha waxbarashadu il gaar ah ku eegaan, la buuxiyo haddii uu gaabis ku jiro, la toosiyo haddii ay turxaani ku jirto, lana fangeliyo si uu qayb uga noqdo agabka waxbarashada ee cilmiga bulshada.

## TIXRAAC


Aliqeyr M. Nur (2024). *Preserving the Traditional Stories: The Knocked-out Eye of the Hyena.* https://www.allsocialsciencejournal.com/

Aw Cabdiqani Xasan (2023) *Ababtinta Tooson.* Sweden

Bashiir Maxamed Xersi (2017). *Hilaadin*. Sweden.

Bashiir Maxamed Xersi (2022). *Dhimaal Dhaqan*. Sweden.

Ciulla, J. B. (2014). *Ethics, the heart of leadership* (3rd Ed.). Praeger.

Clear, J. (2018). *Atomic Habits: An Easy & Proven Way to Build Good Habits & Break Bad Ones*. New York.

Thompson, M., 1949. *The Cry and the Covenant*. New York: Greenberg.